


Diiwaan galinta

Inkastoo barnaamijyada Kaleidoscope ay lacag la'aan yihiin, haddana waxaad u baahan tahay inaad diiwaan galiso. Waxaad diiwaan gelin kartaa caruurtaada adigoo soo wacaya lambarka (612) 871-9268, isla markaasna codsnayaa foomka diiwaan galinta ama adigoo ka naqilan kara shabakadeenna www.kaleidoscope-kids.org. Meelaha bannaan ayaa kooban.

U Deeqid

Barnaamijyada Kaleidoscope ayaa lacag la'aan u ah ilmaha oo idil iyo waalidkood. Barnaamijyadaasi ayaa kaliya lagu sii wadi karaa taageero joogto ah ee deeq bixiyeyaal. Fadlan ka feker inaad caawinto barnaamijyada lagama maarmaanka ah een ka bixinno gudaha magaalada adigoo ku maalgalinaya Kaleidoscope, waxaad maal galisay mustaqbalka caruurtaasi baylahda ah.



Nafti-hure-nimo

Ilmaha ayaa ku baraara u dhug yeelashada qof weyn ee ay ka helaan naftood-hureyaasha u jajaban. Xiriirradaasi ayaa muhiim ah! Naftood hureyaasha oo idil ayaa la siiyaa tababar iyo taageero joogto ah. Waxaa kale oo jira fursad hal mar ah ee kooxo naftood hureyaal ah oo diyaar ah. Fadlan ka wac Xiriiriyaha Naftood hureyaasha Lan. (612) 871-9268.

Yoolasha Kaleidoscope

Kaleidoscope ayaa u muujiyey dadaal xooggan ee carruurta iyo qoysaska jiiraanka Phillips. Sidaas darteedna, Kaleidoscope ayaa leh saddex yool oo muhiim ah:

- Inay siiyaan carruurta bay'ad ammaan iyo baxnaano u leh si ay daryeel iyo xiriirro taageero leh ula yeeshaan facooda iyo dadka waaweynba..
- Inay qoysaska dhaqaale ahaanta u xanniban siiyaan nafis iyagoo ku taageeraya bay'ad ah waxtar leh oo lacag la'aan ah mudada carruurtoodu ay dugsiga ka maqan yihiin..
- Inay hagaajiyaan daryeelaanna guul gaadhka waxbarashada ee caruurtamproove Kaleidoscope.

Waxyaabaha U gaarka ah Kaleidoscope

Bay'ad soo dhawayn leh,
Dad waaweyn oo daryeel leh,
Saamiga Dhallinta waaweyn iyo carruurta,
Caawinaad Shaqo Guriga,
Jiim iyo Dhoobo samaynta garoonka
cayaaraha
Farshaxan
Cunto Karinta
Shaybaarka Kombiyuutarka
Waxqabadyo Waxbarasho
Rixlado ama Safarro



Barnaamijyada Horumarinta dhallinta Dugsiga Kaddib & Xagaaga

2400 Park Avenue South
Minneapolis, MN 55404
(located in the Center for Changing Lives)
Phone: (612) 871-9268
Fax: (612) 871-0173
www.kaleidoscope-kids.org

*Founded in 1971 by
Messiah Lutheran Church and
Our Saviour's Lutheran Church*

Barnaamijyada

Haddii aan nahay Kaleidoscope Place yoolkeenna ayaa ah inaan siinno carruurta bay'ad korin, hal-abuur iyo waxbarashaba leh, si ay wax u bartaan ugana koraan asluubta iyo bulshaba. Waxaan bixinaa dhawr waxqabadyo waxbarashada dugsiga kaddib iyo barnaamijyada horumarinta dhallinyarada ee xagaaga ee ilmaha High Five ilaa fasalka 12aad. Kaleidoscope Place waa xaruun dhexe waxbarasho oo Ruqsad ka haysata Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis. Waxaan ku naalnaa Jiiraanka Philips ee Koofurta Minniyaabolis, wax kharajna ugu fadhiiyay qoysaska isticmaala barnaamijyada adeegyadeenna.

Kids' Place (Goobta Ilmaha)

Goobta Ilmaha ayaa leh 55 arday ee fasallada High Five–5aad, waxayna furan tahay Isniinta Ilaa Jimcaha 1:45-6:00 fiidnimo. Ilmaha ayaa laga caawiyaa shaqo guriga, waxbarashada manhajiga ah ee Heerka Asaasiga ah ee Minnesota, isla markaasna ka qayb qaata tayo galinta iyo waxqabadyo hawaayad abuur leh.

Youth Village (Xaafadda dhalinta)

Ayaa leh 15 arday dhallinta dugsiga dhexe, furanna Isniin ilaa Jimca 1:45 galabnimo ilaa 6:00 maqribnimo. Barnaamijka ayaa lagu bartaa war baahinta & tegnooijiga. Ilmaha ayaa barta sida loo diyaariyo filimada toganaha ah, daabacaadda. Waxay kale oo helaan ka caawinid shaqo guriga iyo casharradooda waxbarasho.

Summer Kids (Ilmaha Xagaaga)

Ilmaha Xagaaga ayaa u adeega 100 carruur ah ee fasallada High Five–6aad, Isniin ilaa Khamiis saacadaha 8:30 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo muddo 8 asbuuc ah ee xagaaga. Ilmaha ayaa ka qayb qaata waxqabadyo manhaj iyo tayo galin, farshaxan & beerta caruurta, iyo rixlooyin asbuucle ah. Waxaan ardayda siinaa maalin walba quraac, qado & af-gashi.



Children's Garden (Jardiinka Carruurta)

Jardiinka Caruurta waxaan la wadaagnaa Jaamicadda Minnesota Qaybta abuurista dhirta iyo geedaha. Waxaa mid kasta oo ka mid ah caruurta aan u adeegno xagaaga siisaa fursad uu ku barto ay ku bartaan jardiinooyinka, nafaqada, iyagoo abuuraya, goosanaya khudaar, ubax dhirta dabiiciga ah.

Youth Staff (Shqaalaha dhallinyarada)

Shqaalaha dhallinyarada ah ayaa ah barnaamij dhallinyaro oo sannadka oo idil shaqeeya ee ilmaha ardayda dugsiga dhexe iyo sare. Dhallinteenna shaqaalaha ah ayaa ka gmacallimiinta caawiya iyo jirdiino yahanno xagaaga ah. Waxay tusaale u yihiin ilmaha yar yar ee barnaamijkeenna ku jira, joogitaankooda waa u muhiim sii waditaanka hadafkeenna.

Families Together (Wadajirka Qoysaska)

Wadajirka qoysaska ayaa bishiiba mar dhacda inta uu dugsigu socdo, waana fursad waalidka iyo carruurtoodu uga qayb qaadan karaan waxqabadyada hawaayad abuurka guud ahaan qoyska oo idil. Qoysaska ayaa ku wada qadeeya Kaleidoscope, islamarkaasna ka qayb qaata waxqabadyo ay ka mid tahay dhismo dhoobo, daawasho riwaayado, iyo mas-raxyada meelaha ka dhow, Iskaating iyo daawasho matxafyada.

